

JADWALKA QASHIN URUURINTA

56F=@

AX IS TA AR KH JM SA

	1	2	3	4	5					
6	7	8	9	10	11	12				
13	14	15	16	17	18	19				
20	21	22	23	24	25	26				
27	28	29	30							

JULAAY

AX IS TA AR KH JM SA

	1	2	3	4	5					
6	7	8	9	10	11	12				
13	14	15	16	17	18	19				
20	21	22	23	24	25	26				
27	28	29	30	31						

OKTOOBAR

AX IS TA AR KH JM SA

	1	2	3	4						
5	6	7	8	9	10	11				
12	13	14	15	16	17	18				
19	20	21	22	23	24	25				
26	27	28	29	30	31					

A 55>C

AX IS TA AR KH JM SA

					1	2	3			
4	5	6	7	8	9	10				
11	12	13	14	15	16	17				
18	19	20	21	22	23	24				
25	26	27	28	29	30	31				

AGOOSTO

AX IS TA AR KH JM SA

						1	2			
3	4	5	6	7	8	9				
10	11	12	13	14	15	16				
17	18	19	20	21	22	23				
24	25	26	27	28	29	30				
31										

NOFEEMBAR

AX IS TA AR KH JM SA

							1			
2	3	4	5	6	7	8				
9	10	11	12	13	14	15				
16	17	18	19	20	21	22				
23	24	25	26	27	28	29				
30										

> I B

AX IS TA AR KH JM SA

	1	2	3	4	5	6	7			
8	9	10	11	12	13	14				
15	16	17	18	19	20	21				
22	23	24	25	26	27	28				
29	30									

SITEEMBAR

AX IS TA AR KH JM SA

	1	2	3	4	5	6				
7	8	9	10	11	12	13				
14	15	16	17	18	19	20				
21	22	23	24	25	26	27				
28	29	30								

DISEEMBAR

AX IS TA AR KH JM SA

	1	2	3	4	5	6				
7	8	9	10	11	12	13				
14	15	16	17	18	19	20				
21	22	23	24	25	26	27				
28	29	30	31							

Uruurinta qashinka caleemaha iyo deyrka ee jidka hareerihisa la dhigo

Munaasabadda Maalinta Qashin Geynta oo adeeg buuxa ah

Adeegyada Wakhtiga Gaaban ah ee Uruurinta Qashinka ee ugu yaraan 2 nooc oo qashin ah

Qashin geynta guriga banaankiisa ah

OGOOW

Uruurinta qashinka caleemaha iyo deyrka ee jidka hareerihisa la dhigo waa isla maalinta qaadista qashinkaaga. Haddii aad leedahay laba maalint oo qashin uruurin ah isbuucii, uruurinta qashinka caleemaha iyo deyrka waa maalintaada koowaad ee qashin uruurinta ee isbuuca.

GOORAHA IYO GOOBAHA ADEEGYADA WAKHTIGA GAABAN EE QASHIN URUURINTA

12-ka Abriil | 58 Dana Ave, Hyde Park | 8:30 am - 12 pm

25-ka Oktoobar | 338 E Eagle St, East Boston | 8:30 am - 12 pm

8-da Nofeembar | 327 Forest Hills St, Jamaica Plain | 8:30 am - 12 pm

QASHIN GEYNTA GURIGA BANAANKIISA AH

6-da Diseembar | 416 American Legion Hwy, Mattapan | 8:30 am - 12 pm

GOORAHA IYO GOOBAHA MAALINTA QASHIN GEYNTA

17-ka Maajo | 400 Frontage Rd | Central PWD Facility | 8:30 am - 12 pm

pm 28-ka Juun | 315 Gardner St | W. Roxbury PWD | 8:30 am - 12 pm

16-ka Agoosto | 315 Gardner St | W. Roxbury PWD | 8:30 am - 12 pm

27-ka Siteembar | 400 Frontage Rd | Central PWD Facility | 8:30 am - 12 pm

GEEDAHA KIRISMASKA

Waxaan uruurinaa geedaha Kirismaska ee jidka hareerihisa la dhigo maalintaada caadiga ah ee qashin uruurinta laga bilaabo 29-ka Diseembar, 2025 - 9-ka Janaayo, 2026. Haddii aad leedahay laba maalint oo qashin uruurin ah isbuucii, Geedaha Kirismaska waxaa la ururin doonaa maalintaada koowaad ee qashin uruurinta ee isbuuca.

HAGAHA QASHINKA IYO DIB-U-WARSHADYNTA EE 2025
[Boston.gov/zero-waste](https://boston.gov/zero-waste)
 Magaalada Boston waxaa ka go'an in ay dadka deegaanka siso agabka iyo adeegyada lagama maarmaanka ah si ay u maareeyaan uma yareeyaan qashinka. Fitiiri Iiiska barnaamijyada buug-yarahaan ama si aad wax badan uga ogaato, booqo: boston.gov/zero-waste

WAXAA MAGAALKA LAGU SOO KORDHIYAY HAAN QASHIN

*Oo loogu talagalay dadka degan Boston kuwaas oo ku nool dhismayaasha ka kooban 6 unug ama ka yar





DIB-U-WARSHADEYNTA QASHINKA GEEDAHA IYO GURIGA BANAANKIISA

keen qashinkaaga geedaha iyo kuwo guriga banaankiisa munaasabadaha Wakhtiga Gaaban ee Qashin Uruurinta ama dhig jidka hareerhiisa maalinta qashinka inta lagu jiro isbuucyada uruurinta qashinka caleemaha iyo deyrka. Wixii faahfaahin dheeri ah booqo: boston.gov/yard-waste

- Ururinta geedaha Kirismaska ee jidka hareerhiisa la dhigo waxay ku aadi doontaa maalintaada koowaad ee qashin uruurinta isbuuclaha ah ee mudeysan laga bilaabo 29-ka Diseembar, 2025 ilaa 9-ka Janaayo, 2026. Geedaha Kirismaska ah oo leh nalalka, waxyaalaha sharaxaada ah, ama ku jira bac caag ah lama qaadi doono. *Qashinka geedaha lama uruurin doono Inta lagu jiro muddadan.*
- Laamaha waa inaysan ka dheereyn 3 cagood, dhumucdooduna ka dheereyn 1 inji, waana inaysan ku xirneyn xarig.
- Bacaha caagga ah, ciidda, iyo geedaha muljiga lama oggola mana la uruurin doono.



QASHIN URUURINTA

Qashinka waa in la dhigaa jidka hareerhiisa intaan la dhaafin 6:00 subaxnimo ee maalintaada qashin uruurinta mudeysan, ama ka dib 5:00 galabnimo ee habeenka ka hor maalintaas. Si aad wax badan uga ogaato booqo: boston.gov/trash-and-recycling

- Saabaanka waa la dhigi karaa jidka dhinaciisa. Magaalada ma ururiso wax qashin ama agab dhisme ah.
- Fuustooyinka, bacaha qashinka, iyo qashin kasta oo la dhigo jidka hareerhiisa si loo qaado waa in miisaankooda UUSAN ka badneyn 23 kiilo.
- Magaalada waxay kugula talinaysaa inaad si toos ah u dhigin bacaha qashinka jidka hareerhiisa. Ku rididda bacaha qashinka weelal waxay yareyneysaa hawlaha jirka.

ISKU-DHAFKA WAXYAALAHA DIB LOO WARSHADEYNAAYO

Dhig waxyaalaha birta ah, dhalada, waraaqaha, caaga adag, iyo kartoomada jidka hareerhiisa intaan la dhaafin 6:00 subaxnimo ee maalintaada qashin uruurinta, ama ka dib 5:00 galabnimo ee habeenka ka hor maalintaas. K raadi qeybta baarintaanka ee App-ka Trash Day si aad u ogaato saad uga takhalusi laheyd walxaha aan loo baahnayn. Wixii faahfaahin dheeri ah booqo: boston.gov/recycling



- Fadlan xoogaha dhaq weelasha cuntada ka hor inta aan dib loo warshadeyn.
- Kartoomada biisaha, xitaa haddii ay saliid leeyihiin, waa laga oggol yahay barnaamijka dib-u-warshadeynta ee Boston.
- Kartoon kasta oo la galin waayo haanta buluugga ah waa in la fidiyaa, la isku duuduubaa, oo lagu xirxiraa xarig. Dhirirkiisa waa inuusan dhaafin 3 feet (qiyaastii 1 mitir). Fadlan jarjar kartoomadda TV-ga oo ka dhig kuwo yaryar ah si ay u galaan haanta buluugga ah. Baakadaha waa INEYSAN wadan caag ama styrofoam (suufka qafiifka ah ee alaabta lagu duubo)
- Bacaha balaastiga ah iyo styrofoam (suufka qafiifka ah ee alaabta lagu duubo) lama oggola in la dhigo jidka dhinaciisa si dib-u-warshadeyn loogu sameeyo. Magaalada waxay bogaadineysaa isticmaalka weelasha wax lagu qaado ee
- cunadda oo marar badan la isticmaali karo halkii laga isticmaali lahaa weelal halka mar ah markaad dukaameysaneysaan.

ARUURINTA JOODARIYAASHA

Dhammaan joodariyaasha waa in dib loo warshadeeyaa sida ku xusan xeerka MassDEP. Si dib loogu warshadeeyo joodariyaashaada ama box spring (qalab la geliyo inta u dhaxeysa sariirta iyo joodariga) fadlan balan qabso si lagaaga qaado adigoo dhigaya jidka dhinaciisa. Si aad u hesho faahfaahin dheeri ah ama aad balan u qabsato, booqo: boston.gov/mattress

- Joodariyaasha futons-ka iyo suufka joodariga kor laga saaro waa laga oggol yahay qashin uruurinta jidka dhinaciisa ah
- Haddii aad ku nooshahay dhisme ka kooban 7 unug ama ka badan, fadlan la xiriir joodari qaade ka madax banaan dowladda ama weydii maareyahaaga dhismaha sidii dib loogu warshadeyn lahaa joodariyaasha.



DIB-U-WARSHADAYNTA DHARKA

Ka dhig dharkaaga/maroooyinkaaga kuwo mar kale la isticmaali karo! Waxaad geysaa iyaga sanduuqa qashin geynta ama ballan qabso si lagaaga uruuriyo dharka iyo alaabta yaryar ee guriga ee jidka hareerhiisa la dhigo. Si aad wax badan uga ogaato booqo: boston.gov/textiles

- Fadlan xaqiiji in dhammaan dharka ay nadiif yihiin, qalalan yihiin, oo aan shiir laheyn.



MAALINTA QASHIN GEYNTA

Keen agabka qashinka halista ah ee gurigaaga iyo walxaha qaar ee meelaha kale aan laga ogoleyn in la qaado munaasabaddaha qashin uruurinta ee sannadka oo dhan. Si aad wax badan uga ogaato booqo: boston.gov/zero-waste-day

- Magaalada waxay qabanqaabisaa munaasabaddo Qashin Uruurin ah iyadoo aqbaleysa walxaha sida batariyada baabuurta, rinjiga saliidda leh, dharka iyo maroooyinka, batariyada lithium-ka leh, nalalka, elektaroonigga, iyo warqadda la jarjaray.
- Magaalada waxay sidoo kale qabanqaabisaa munaasabaddo Qashin Qaadis oo wakhti gaaban ah si loo qubo qashinka si sax ah ee qaar ka mid ah walxaha halista ah ee guriga iyo walxaha meelaha kale aan laga ogoleyn in la qaado. Munaasabaddahaan waxaa laga helayaa adeegyo qashin uruurin ah ee ugu yaraan 2 nooc oo qashin ah. Ka fiiri qadka bogagga munaasabaddaha si aad u ogaato walxaha laga ururinayo dhammaan qashin uruurinta wakhtiga gaaban.



DIB-U-WARSHADAYNTA QASHINKA CUNTADA

Ka qayb qaado xakameynta dhibaatooyinka iyo hawlaha jirka! Isdiwaangeli si aad u hesho adeegga bilaashka ah ee qaadista qashinka cuntada la dhigo jidka hareerhiisa ama raadi fuustada kuugu dhow ee geynta qashinka cuntada dib loo warshadeynaayo. Wixii faahfaahin dheeri ah booqo: boston.gov/food-waste



URURINTA WAXYAALAHA GAARKA AH

Mudeyso qaadista qashinka la dhigo jidka dhinaciisa si lagaaga aruuriyo qalabyada hoos ku xusan adigoo booqanaya: boston.gov/special-item-collection

- TV-yada
- Qalabka Mukeefka
- Talaajadaha *
- Qaboojiyayaasha *
- Qaboojiyayaasha biyaha
- Dehumidifiers (Qalabka Yareeya Uumi-biyoodka Guriga)
- Kombiyuutaradda waaweyn
- Laabtoobyada

*Talaajadaha iyo qaboojiyayaasha waa in la faarujiyaa, albaabadana laga siibaa

Fadlan booqo Bogga Liiska Hagaha Zero Waste ee Boston si aad u heshid xaruumaha dib-u-isticmaalka, barnaamijyada dib-u-celinta, ama kooxaha baraha bulshada ee alaabta ka dhigaya kuwo mar kale la isticmaali karo: boston.gov/zero-waste-directory



SOO DEGSO APP-KA TRASH DAY

Soo degso App-ka bilaasha ah ee Trash Day si aad u aragto jadwalkaaga qashin uruurinta, u sameeyso xusuusinnno, aadna u heshid ogeysiisyada isbeddelada jadwalka. Qeybta raadinta ka baar liiska adeegyada dib-u-warshadaynta iyo qashinka si aad u ogaato saad uga takhalusi laheyd walxaha aan loo baahnayn. Waxaa laga heli karaa Apple iyo Google Store-ka.



Iskaangaree QR koodhka si aad ula soo dagto